# CUTUBKA KOOWAAD: ABUURISTII HEY'ADDA CILMIBAARISTA BADAHA SOOMAALIYEED

Maxaa keenay in la abuuro Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed?.

Fikradda abuurista Hey'addaan waxay jirtay sanooyin badan oo la dareemayay in loo baahan yahay in wax badan Dowladdu ka ogaato BADAHEEDA Xag Kheyraad, Badmarid, Nabadgelyo … iwm.

Fikradaani way socotay intii ay jirtay dowladdii KACAANKA, waxaase in door ah dowr mugle ka qaadanayay C.BADDA Soomaaliyeed oo hortaagnaa dhibaatooyin badan oo soo muuqday ka dib burburkii dowladdii dhexe ee Dalka 26-01-1991kii.Waqtigii dowlad la'aanta ee 1991-2000 waxaa badda Soomaaliyeed ka jiray tacaddiyo badan oy ugu horreyaan Xaalufinta Kheyraadka (Nool) ee badda, Wasakheynta badda, Kicitaankii burcad-badeedka … IWM.

Haseyeeshee laga billaabo soo bixitaankii Dowladihii KMG ah (2000-2012), waxaa aad loo dareemay inay daruuri tahay in wax badan laga ogaado badaheenna, gaar ahaan markii laga sheegay SHIDAAL meelo badan oo ka mid ah biyaha Soomaaliya, gaar ahaan Koonfurta badda Soomaaliya oo Dowladda Kenya sheegatay una gudubsatay UN ka 2005tii.

Waxaa arrinta abuurista Hey'adda soo dedejiyey heshiis ku sheeggii isafgarad ee Soomaaliya iyo Kenya (07-04-2009).

Heshiiskaan is-afgarad wuxuu ka dhex abuuray shacabka Soomaaliyeed buuq xad-dhaaf ah, taasoo keentay in Barlamaanku uu buriyo isafgaradkaan, ADM Faarax Taliyihii C.Badda (2009-2013) wuxuu ku lahaa dowr shariif ah, wuxuuna u qoray Barlamaanka warqadda sawirkeedu hoos ku yaal.

Markii looga doodaayey barlamaanka heshiis ku sheeggii Soomaaliya iyo Kenya, ADM Faarax waxaa loogu yeeray inuu barlamaanka hortiisa ka caddeyo waxa ka imaan kara isafgaradkaan: wuxuuna ku taliyey in la is-hortaago heshiiskaan waayo waa HALIS. Admiraalku khudbad dheer ayuu ka horjeediyey barlamaanka, waxaana ka mid ahaa warkiisa: Markii looga doodaayey shirweynihii 3aad ee Qaanuunka Badda ee lagu qabtay Magalada Montego- bay ee dalka Jamaica 1982, waxaa madax u ahaa wafdigii J.D. Soomaaliya Prof. Max'ud Cali Tuuryare (oo

warkaan uu ka soo weriyey ADMku). Prof. Tuuryare wuxuu yiri: " waxaa ii wada yimid wufuuddii USA & URSS, waxayna iga codsadeen inay noqdaan biyaha Qaranka Soomaaliya (Territorial Water) 12NM; waxaan ku iri: Dowladeydu waxay I soo fartay in biyaheenu ay noqdaan 200NM. (waa inta uu qabay xeer L. 37 ee 10 Sept 1972kii). Waxay ku dheheen Profka: Annaga ayaa ku soo qancineyna Madaxweyne Max'ed Siyaad 12NM, dokumentina waan kaaga keeneynaa.

Beryo yar ka dib, Prof. Tuuryare wuxuu yiri: Taar ayaa iga soo gaaray dowladda J.D. Soomaaliya oo oranaaya inaan aqbalo 12NMka. Hase yeeshee Madaxweyne M. Siyaad ayaa taleefan kula soo hadlay Prof. Tuuryare: wuxuuna ku yiri: Waxba kaama gelin taarkeyga, anigu waxaan kaa rabaa 200NM, haddii kale dambiile ayaad tahay, wuxuuna ku celceliyey diid taarkeyga". Arrintii waxay ku dhamaatay oo la isku waafaqay heshiiskii UNCLOS 10/12/1982kii, biyeheennuna waxay noqdeen sidaan: 12NM. Biyaha Qaranka, 12NM biyaha Xiga inta kale ilaa 200NM EEZ. ADM Faarax markii uu qisadaan u aqriyey Xildhibaanada wuxuu ku yiri: WARKAN TAARIIKHDA GALEY: Hal nin (Max'ed Siyaad Barre) ayaa Sidaas ka dhigay biyaha Soomaaliya ee ma adinkoo ah 550 Xildhibaan ayaa dhiibaya qeyb ka mid ah biyaha Dalka.

Markaas ayaa SACAB isqabsaday Qaacada Barlamaanka, Natiijadiina waxay noqotay in Barlamaanku burriyo Heshiiskii Isafgarad, ayadoon loo kala harin.



Admiral Faarax oo khudbad qiima leh ka jeedinaya Barlamaanka

# IFTIIMIN XOG SHARCIYEED IYO MID KHIYAANO

3/10/2011

Waxaan ka codsanayaa Xildhibaanada Sharafta leh inay isha mariyaan warqaddaan xambaarsan Xog Sharciyeed iyo xog khiyaano

1- 1959 –60: Biyaha Dalku (B.D.) = 6.N.M.(11km) (waayoo Maraakiib Dagaal ma qabin )
2- 1966 – B.D. waxaa laga dhigay : 12 N.M. (22km) ( waxaan yeelanay 6 Markab oo yar yar)
3- 1972- B.D. waxaa laga dhigay : 200N.M. (370KM) (waxaan qabnay 6 Markab oo yar yar; 4 markab oo sawaariikh sida iyo 4 Markab oo Torbeedo sida… iyo kuwo kale)
4- 1982. Waxaan Saxiixnay UNCLOS (Xeerka Badaha ee Caalamiga ah). Waxaanna caddeynay in Biyaheenu ay yihiin 200 N.M. (370)
5- 1988 – Waxaan soo saarnay Sharciga Badda oo la waafajiyey UNCLOS.

**(Ma caddeyn karo inuu ahaa Qabyo-Qoraal iyo in kale).**

Shaciigaan (1988) wuxuu ka dhigay Biyaheena Sidaan:-

a- Biyaha Dalka .......................... 12 N.M. (22KM)
b- Biyaha Xiga .......................... 12 N.M. (22 KM)
c- EEZ .......................... 176 N.M (326 KM)

Wadarta Biyaha .................. 200 NM = (370 KM)

6- Farqiga Xeer 1972 iyo Xeer 1988 waa:
Xeer 1972 Biyaha Dalku = 200 N.M. (370 KM) = EEZ Ma jiro
Xeer 1988 Biyaheenu = 12 +12+(EEZ = 176) = 200 NM (370 KM), **EEZ waa jirtaa**
7- May 2009 waxaa Somalia ay N.M gaarsiiyey: 150 N.M= (278 KM) (Contenental Shelf )
Haddaba: Xuquuqda Somaliya ee Badeed = 350 NM= (648 KM)
8- Looma baahneyn heshiiskii lala galay Kenya 2009kii oo Baarlamaanku Buriyey, waayoo: Contenental Shelf iskuma khilaafi karaan laba Dowlo ee is garab deggan ee waxaa isku qabsan karaan laba Dowladood oo isku beegan sida Somaliya iyo Yaman.
9- Haddii Sharci 1988 uu ahaa Qabyo-Qoral waxa inoo jira waa Sharci : L-37 ee 1972 oon ogoleyn EEZ .
10- Haddaba si loo ogolaado Somali EEZ waxaa loo baahan yahay in la Buriyo Xeer L. 37 ee 1972. Waxaana markaas loo baahan yahay cod ah 4/5 = 80% = 440 mudane oo HAA ugu codeeya: EEZ. Qod. 4 ee Dastuurkii 61kii, waayoo Dhul ah Hanti Dowlo ayaa laga Tanaasulayaa
11- Shirkii Seycilis ee EASF oon ka qeybgalay waxaa lagu soo bandhigay in Biyaha Dalka Somaliya ay yihiin 12 NM oo kaliya; laakin Gaashaanka ayaan u daruuray halkaasna waxaa ka cadaatay Shirqoollada naloo maleegayo
12- Waxaan qabaa in Barlamaanku uu Arrintaan Badda dib isaga dhigo, Amarna ku siiyo Xukuumada iney Abuurto Guddi, khubaro Badeed ah oo waddaniyiin, ah Talo-Cilmiyeedna ka soo jeediya oo Go'aan Siyaasadeed lagu qaadan karo.

Mahadsanidiin

Admiral Faarax Axmed Cumar Taliyaha C.Badda & D x

Waa sawirka warqadda ADM Faarax uu u qoray BARLAMAANKA, ka hor inta aan loogu yeerin khudbada

Waxaa xigay shir ay Hey'adda Difaaca oy leeyihiin dowladaha geeska & bariga Afrika(EASF)27-09-2009 oo lagu qabatay Dalka Seychelles oon xubin ka nahay.ADM Faarax wuxuu matalaayey D.F.S. Shirkaas waxaa lagu soo jeediyey 2(labo) arrimood:

1. In 6(lix) doomood oy saaran yihiin ASKAR KENYAN ah oo ku biirta AMISOM, loo diro Soomaaliya xilkeeduna yahay inay ilaaliyaan DEKEDDA XAMAR; ADMIRAL Faarax wuxuu codsaday in lagu soo wareejiyo Doomankaas C.BADDA SOOMAALIYEED; hase yeeshee looma ogalaan. ADMIRAALKUNA wuu diiday doomahaas, gabi ahaanba inay soo caga dhigtaan geyiga Soomaaliya, waayo heshiiska ay ku joogaan AMISOM, C.BAD kuma jiro. Dhinaca kalena, waxay u muuqatay arrinta doomaha inay horseed u ahaan kareen CIIDAN BADEED OO AJANABI AH oo soo gala dalkeenna.
2. Arrinta labaad waxay ahayd ayadoo waraaqadaha shirka loo qeybiyey ay ku yiilleen in Biyaha Qaranka Soomaaliyeed (Somali Territorial Water) ay yihiin 12NM. (22km), wax kale oo xuquuq ah oo Soomaali Badda ay ku leedahana aysan jirin. Arrintaan oo keentay in ADMIRAALKU uu shirka hordhigo dacwad ah in meel looga dhacay Qarannimada Jamhuuriyadda Soomaaliya shirkana ka dalbaday cudur daar. Waxaa mahad weyn lahaa saraakiil Soomaali ah oo soo diyaarisey dacwad hoosna ugu dhiibtay Admiraalka si uu u qeybiyo. Taa macnaheedu waxay tahay inaan loo kala harin difaaca danaheena (gaar ahaan badaha) oo shacbiga Soomaaliyeed iyo xukuumaduba ay wel wel weyn ka qabeen.

WAXAA MUDAN IN LA SAJILO: IN CIIDANKA QALABKA SIDA EE KENYA UU DALKA SOO GALAY (4300 ASKARI) TODOBAAD KA YAR MARKII AAN DIIDNEY DOOMANKII HUBEYSNAAY EE KENYA. Waxaa intaas la sii jira in Kenya ay u qortay QM in ay leedahay qeyb ka mid ah Biyaha Qaranka Soomaaliya 2005kii,sida aan hore ugu soo xusnay. Arrimahaan isbiirsaday ee ah u hanqaltaaggidda iyo sheegashada badaha Soomaaliyeed oo lagu kordhiyey dhibaatooyinka xaalufinta, Wasakheynta badda, burcad-badeedka … iwm ayaa ahaayeen sababaha tooska ahaa ee ka dambeysay abuurista **<u>Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed.</u>**

Sidaas awgeed Raiisul Wasaare Dr Cabdi Wali M. Cali Gaas ayaa soo saaray Decreetada lagu asaasay Hey'addan 24-01-2012kii, oo *sawirkeedu kan yahay.*

Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha — مكتب رئيس الوزراء

***The Transitional Federal Government of the Somali Republic***

**Office of the Prime Minister**

**Ref: XRW/ LT/00.132/01/12** **Date 24.01.2012**

Ujeedo: **Dhismaha Xarunta Daraasaadka Khayraadka Badaha Soomaaliyeed— Somalia Marine Resources Research Center (SMRRC)**

**KU: Dhammaan Wasaaradaha**
**KU: Taliska Xooga Dalka Soomaaliyeed (XDS)**
**KU: Admiral Faarax Axmad Cumar**
**OG: Madaxweynaha DFKM Soomaaliya**

Iyada oo laga ambaqaadayo fulinta Road-Mapka iyo Barnaamijka Xasilinta iyo Nabadgalyada Dalka **(NSSP)** qodobkiisa **2.11** oo ku saabsan lagama maarmaan-nimada difaaca Badaha Soomaaliyeed, ayaa laga billaabo manta, oo taariqdutahay 24 Janaayo 2012, la dhisay **Xarunta Daraasaadka Khayraadka Badaha Soomaaliyeed—Somalia Marine Resources Research Center (SMRRC),** oo ah Hay'ad cilmibaaris oo madax bannaan.

**Ujeedada Dhismaha Hayaddda:**

- Mideynta aqoonyahannada Soomaaliyeed ee ku xeel dheer culumta badaha iyo sharciyadoodaba, **(Think Tankers).**
- Talo siinta khabiirnimo **(Advisory Expertise Role)** si joogto ah hayadaha dawliga ah arrimaha quseeya difaaca danaha Badaha Soomaaliyeed, Khayraadka ku jira, iyo la socodkoodaba gaar ahaan marka looga hadlayo shirarka caalamiga ah.

Waxaan Guddoomiye ku meel gaar ah u magacaabay **Admiral Faraax Axmad Cumar,** isaga oo sii wata shaqadiisi Taliyenimo ee Ciidanka Badda, ayaa wuxuu u xilsaaran yahay in uu laba bilood gudahood soo diyaariyo una soo gudbiyo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha qaab dhismeedka (Charter) Hayaddan Cusub sida: Waajibaadka shaqo, Xubnaha (Membership), iyo Dhaqaalaha Hayadda.

Dhammaan Wasaaraddaha iyo Hayaddaha kale ee Dowladda waxaa lafarayaa in ay gacan ka gaystaan sidii Hayaddan u qabsanlahayd howlaha loo xilsaaray.

Mudane Dr. Cabdiweli Maxamed Cali
Ra'iisul Wasaaraha Xukumadda FKM ee Soomaaliya

**+2526-18555573 +2526-18900015 Fax +2525-941017 E-mail: pm@opm.gov.so Mogadishu, Somalia**


Decreetadii R/W Dr. Cabdiwali M. Cali Gaas uu ku abuuray HCBS.

Decreetadu waxay tilmaantay:

1. Magaca Hey'adda.
2. Waajibaadka Hey'adda.
3. Madaxa Hey'adda oo KMG, ah waxaana loo magacaabay ADM. Faarax Axmed Cumar asagoo weli sii ah Taliyaha Ciidanka Badda (wuxuu isku heynayaa labada xil).

Waxaa decreetada looga dalbaday Guddoomiyaha KMG ah:

Inuu ku soo gudbiyo muddo laba bilood ah xeerka Hey'adda (Charter).Muddadii ahayd 2(labada) bilood ayaa Guddoomiyahu ku diyaariyey xeerkii (Charterkii), wuxuunna gudbiyey 5-3-2012; eeg *sawirka warqadda hoose.*



HEY'ADDA DARAASAADKA BADAHA SOMALIYED(HDBS)

5/3/2012

HDBS/A-NIL/12

KU: R/WARAAHA DFKMG
Prof. Dr. CABDIWELI MAXAMAD CALI GAAS

MUDANE R/WASAARE,

Iyadoo la tixraacayo Dikareetadii aad iigu magacawday Guddomiyennimada KMG ee Hey'addan Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed ayaan halkaan kuugu soo gudbinayaa Xeerni-daamiyaha Hay'adda oy ku cad yihiin Ujeedada Hey'ada, Xilkeeda, Qaab - dhismeedka iyo Xubnaha Cilmibaarayaasha (Heerkooda Cilmiyeed, Shuruudooda Shaqo iyo Abaalmarintooda), sidoo kale Ilaha Dhaqaalaha Hey'adda iyo xiriirkeeda Cilmi Baariseed Gudaha iyo Dibadda.

Sidaas awgeed waxaan ka rajeynayaa R/Wasaaraha inuu noo saxiixo Xeerni-daamiyahaan ku Lifaaqan warqadaan si ay Hay'adu u howl gasho.

Mahadsanid Md. R/Wasaare

Admiral Faarax Axmed Cumar
Guddomiyaha

Lifaaqyo :

1- Dikareetadii Magacaabidda
2- Xeer-Nidaamiyaha Hey'adda
3- Miisaaniyadda Hey'adda ee 2012

Warqaddii ADM Faarax ku gudbiyey Chatarka HCBS.

Xeer-nidaamiyahan oo dhameystiran waxaad ka heli kartaa website ka HCBS aan ku leenahay barta internetka cinwaankiisuna yahay **smrrc.org.so,** hase yeeshee halkaan waxaan ku soo sawireynaa bogga koowaad iyo kan dambe oo sita saxiixa Md R/W Cabdiwali M. C. Gaas.

Jamhuuriyadda Soomaaliya
Xukuumadda Federaaliga KMG ee Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال
الحكومة الانتقالية الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

***The Transitional Federal Government of the Somali Republic***
**Office of the Prime Minister**

**RE:**

**March 5, , 2012**

**UJEEDO: Xeer-Nidaamiyaha Maamulka Hey'adda Daraasaadka Badaha Somaliya (HDBS)**

- Iyadoo Sanooyinkii ka dambeeyey Burburkii Dowladdii dhexe ee Somaliya 1991kii, lagala kulmay dhibaatooyin badan Badaha Somaliya sida Xaalufinta kheyraadka Badda, wasakheynteeda, Burcad Badeedka, iyo guud ahaan wax ka ogaansho la'aanta dhabta ah ee xaaladda dhaqaale, amni iyo Deegaan ee Badaheenna ;
- Iyada oo ay lagama maarmaan noqotay in la abuuro Hey'ad qaabilsan Cilmibaarista arrimaha kor lagu soo xusay, si loo helo aqoon iyo ogaal sugan oo go'aamada siyaasadeed lagu qaadan karo;
- Iyada oo laga tixraacayo dekretada **RE: XRW/LT/00.132/01/12 ee January 24, 2012** ee lagu dhisay Hayadd Cilmibaaris ku samaysa badaha Soomaliyeed iyo khyaraaka ku jiraba, iyada oo laga ambaqaadaya fulinta Road-mapka iyo Barnaamijka Xasilinta Dalka **(NSSP)** qodobkiisa **2.11** oo qeexaya lagama maarmaan-nimada difaaca Badaha Somaliyeed;
- Ayaa laga billaabo manta waxaan ogolaaday in **Xeer Nadaamiyaha** soo socda lagu maamulo **Hay'adda Daraasaadka Badaha Soomaaliyeed**:-

**Qod. 1aad: Magaca Hey'adda**


Magacu Hey'addu waa : **Hey'adda Daraasaadka Badaha Soomaaliyeed** waana mid Dowladeed oo madax bannaan, hoos tagtana Golaha Wasiirrada, mana aha mid Macaash doon ah:-

**Qod. 2aad: Nooca Daraasaadka Hey'adda**

Daraasaadka Hey'addu u xilsaaran tahay wuxuu koobaa:-

1- Kheyraadka Badda, Noole iyo ma noole
2- Dhaqaalaha Sekterka Badda
3- Deegaan Badeedka
4- Culuunta Badda
5- Nabadgalyada Badda
6- Burcad Badeedka
7- Xaaladda Badmaridda iyo Soohdimaha.
8- Iyo wax kasta oo xiriir la leh Badaha Dalka.

Bogga 1aad ee Chatarka HCBS (Xeer-nidaamiye)



**Qod. 26aad: Dhaqangal**

Xeer Nidaamiyahan wuxuu dhaqangalayaa markii uu ogolaado Golaha Wasiiradu, saxiixana R/wasaaraha Dowladda Somalia

Prof. Dr. Cab/wali Max'ed Cali
R/Wasaaraha Dowladda Somaliya

Warqadda ugu dambeysay Xeer-nidaamiyaha oo sidata saxiixa R/W Cabdiwali M. C. Gaas

Xeerkan wuxuu ka kooban yahay 26 qodob, waxaana laga heli karaa website ka Hey'adda **smrrc.org.so.**sida aan hore u soo sheegnay.

Hey'addaan waxaa loogu talagalay ASALKEEDII hore inay hoos timaado xafiiska R/Wasaaraha.Xeerkeeduna noqdo xeer- nidaamiye.

**MARXALADDII 2AAD** EE ABUURISTA HEY'ADDA IYO XOOJINTEEDA MUDDADII KA DAMBEYSAY OGOLAANSHIHII XEER-NIDAAMIYAHA HEY'ADDA EE MAARSO 2012KII, Guddoomiyaha KMG ee hey'addu wuxuu raadiyey KAADER howsha lagu billaabo, waxaan wada shaqeyn (xog uruurin) wada billownay Gen. Axmed Sh. Max'ed Faruur oo markaas la shaqeynayey Hey'adda EASF oon hore u soo xusnay. Dabadeed waxaan nagu soo biiray oon wada tashi inoo billowday Md Max'ed Cumar Saalixi. Hase yeeshee markii xukuumadii Dr. Cabdi Wali la beddelay Okt 2012kii; bil ka dib waxaan bandhig u sameynay Madaxweynaha Xasan Sh. Max'ud, anigu waxaan ka Hadley guud ahaan Qawaaniinta Badda, S/GUUTO Axmed Shiikhna wuxuu ka hadlay arrimo hoose oo ku saabsan danaha ay ka wataan xeebeheenna dowladaha deriska ah; Md Saalixina wuxuu ka hadlay Geologiyada badaha iyo sida dhagaxda asalka ah ay u abuurantay malaayiin sano ka hor; wuxuu yiri Jaziirada Madagasgar waxay ku dhegganaan jirtay xeebta Soomaaliya oo u dhexeysa Xaafuun iyo Hobyo, waxayna ka go'day malaayiin sano ka hor, Qaaradda Hindiya oo bari ka saarneedna bari ayey usii carartay, hog weyn ayaana ka dhashay halkaas, sidoo kale wuxuu ku daray Md Saalixi: shidaal ayaa ka buuxa Jaziiradda Madagasgar, dhulkii ay ku beegnaan jirtay ee gobollada Soomaaliya asagana shidaal ayaa ka buuxa.

Markii uu maqlay Madaxweyne Xasan Shiikh sheekadaan dhul guurguurka ah wuxuu yiri: Md Saalixi aniga ayaa idinkala wareegay, wuxuuna ka mid noqday la taliyaasha Madaxtooyada.

Haddaba meeshaas waxaa lagu waayey laba aqoonyahan oo la isku halleynayey Gen Axmed wuxuu ku mashquulsanaa EASF, dabadeedna wuxuu soo galay wasaaradda gaashaandhiga Md Saalixina meeshiisa allaha ku amaansado.

## Hey’adda & Barlamaanka

Waxaa soo ifbaxday qeybtii dambe ee 2012kii, in loo baahan yahay in barlamaanku ogolaado abuurista hey’adda si ay u noqoto mid madax banaan oo yeelan karta xuquuqda hey’adaha dowladda oo dhameystiran.

Arrintaan Admiraalku wuxuu gaarsiiyey Madaxweynaha, waana garwaaqsaday arrinta, waqtigaas waxaa nala joogay xafiiska Madaxweynaha wasiirka Maaliyadda ee hore Max’ud Xasan Saleebaan “Cawil”, Madaxweynuhuna wuxuu faray wasiirkii inuu I kaxeeyo iina geeyo R/Wasaaraha Cabdi Faarax Shirdoon “Saacid” si dokumentiga (Xeerka) hey’adda loogu gudbiyo Golaha Barlamaaka; hase yeeshee wasiirkii indha dambe lama saarin.

**MUSHAARKA SHAQAALAHA:**

Markii ay isku yimaadeen xoogaa Cilmibaarayaal ah oon sii riixnay howsha hey’adda waxaa soo baxday mushkiladdii mushaarka.

Waxaan u qoray warqadda soo socota guddoomiyaha barlamaanka, kana codsannay in shaqaalaha hey’adda loo helo mushaar,  markaasna waa (dhamaadkii 2012), waxaa miisaaniyadda 2013ka laga reebay saddex hey’adood (hey’addaan, tan Qaxootiga iyo tan musiibooyinka).Hase yeeshee waxaan ku doodeyey in shaqaaluhu ay shaqeeyaan, xaqna ay u leeyihiin mushaar.EEG sawirka warqadda guddoomiyaha barlamaanka loo qoray 15/12/2012.

Guddoomiyaha barlamaanka Md Max’ed Sh. Cismaan – Jawaari wuu nala gartay dhibaatada jirta, asagoo ku mahadsan, wuxuunna warqadda hoos ku sawiran u qoray 21/3/2013 wasaaradda Maaliyadda, siiyana OG.R/W iyo Madaxweynaha. Hase yeeshee Wasiirka Maaliyadda Md Max’ed Xasan Saleebaan (Cawil) ayaa go’aamiyey sida ka muuqata warqadda guddoomiyaha barlamaanka dusheeda “Eeg sawirkeeda” in hey’addaani aysan ku jirin Miisaaniyadda. Runtii wasiirkA oon qaabilay gar ayuu sheegay, laakiin waxaan u gartay inay tahay GAR DHIBLEY.

<u>DOWRKII BARLAMAANKA:</u>

Jamhuuriyadda Soomaaliya
Golaha Wasiirada

جمهورية الصومال: مجلس الوزراء

Somali Republic
Council of Ministers

*HEY'ADDA DIRAASAADKA BADAHA SOOMAALIYEED (HDBS)*
*SOMALI MARINE RESOURCES RESEARCH CENTRE (SMRRC)*

**Ref:HB/A-10/12** **DATE:18/12/2012**

**Ujeeddo: Ogolaansho Howl-wadasho**

**Ku: Guddoomiyaha Baarlamaanka F/S… Muqdisho**

Mudane Guddoomiye, salaan diirran kadib, waxaan kula socodsiinayaa in Hey'adda Daraasaadka Badaha Soomaaliyeed ay ka mid ahayd 3 (Seddexdii) Hey'adood ee uu hakiyay Guddigii Baarlamaanka ee dib u eegidda Miisaaniyadda.

Haddaba, waxaan kula socodsiinayaa in FIKRADDA ABUURISTA Hey'addaan ay kasoo baxday doodihii ka socday gudaha iyo dibadda ee Baarlamaanka iyo aqoonyahanka Soomaaliyeed ay ku difaacaayeen Badaha Soomaaliyeed: Xudduudohooda, kheyraadkooda…IWM.

Sidaas awgeed, Hey'addaan waxaa lagu abuuray GO'AAN kasoo baxay Xafiiska R/Wasaaihii Hore (MD Gaas) 24/01/2012. Anigana si kumeelgaar ah la'iigu magacaabay Guddoomiye; waxaa uu R/Wasaaruhu saxiixay Xeer-Hoosaadkeeda 05/03/2012.

Muddadaas wixii ka dambeeyay Hey'addu shaqo ballaaran ayay qabatay, dokumeenti fara bandanna way soo'uruurisay, aqoonyahanno bandanna way kusoo xirmeen, welina waxay waddaa baaris qoto dheer oo taabaneysa dhamaan danaheenna Badaha. Intaa waxaa lasii jira inaan warbixin ka siinnay Madaxweynaha una gudbinnay dokumeenti badan.

Sidaas awgeed, waxaan kaa codsaneynaa MD Guddoomiye inaad u fasaxdid Hey'adda in ay sii wadato howsheeda ayadoo ku shaqeyneysa Xeerkeeda.

Mahadsanid

FG: Warqaddaan waxaa la socda Dokumeentigii lagu aasaasay iyo Xeerkeeda.

HAY'ADDA DIRAASAADKA BADAHA SOOMAALIYEED — SOMALI MARINE RESOURCES RESEARCH CENTER — HDBS — SMRRC

Guddomiyaha KMG ee Hay'adda

ADM. GAAS Faarax Axmed Cumar

Tel: +25261-5152000 / +25269-9447795
E-mail: smrrcenter@gmail.com / hamaruniv@hotmail.com

Warqaddii loo qoray guddoomiyaha barlamaanka si howsha aan u sii wadanno iyo mushaar inaan helno.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

الجمهورية الفيدرالية الصومالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
House of the People
Office of the Speaker

Ref: 374/XG/11/13:الرقم

Mogadishu, 21 Maarso 2012 التاريخ

**Ku:** **Wasaaradda Maaliyada Lacagta iyo Qorshaynta Qaranka**
**=Muqdisho=/**

**Og:** **Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka Somalia**
**=Muqdisho=/**

**"** **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federalka Somalia**
**=Muqdisho=/**

**Uj:** **Fasaxidda Gunnooyinka Shaqalaha Hay'ada: – Daraasaadka Badaha Soomaaliyeed**

Miisaaniya-dda kuma jirto Hay-ddaani
Cawil
13/4/13

**Mudane Ra'iisul Wasaare;**

Tixraac afti qoraalka Golaha Shacabka ku ansixiyey miisaaniyadda sadax–biloodalaha lagu ansixiyey – taas oo Hay'ado dhowr ah ka soo ifbaxeen in dhismahooda sharci ahaaneed iyo shakhsiyadooda qaanuuneed uusan dhamaystirneen.

Maadaama shaqaalaha Hay'adan xilkoodu gudanayaan sida ku cad warbixinnada halkan ku lifaaqan, waxaan ku talineynaa in shaqaalaha Gunnooyinkoodi la siiyo, sharciga dhismaheedana la soo dhamaystiro.

**Inaga guddooma salaan diiran iyo qaddarin**

**F.G:** eeg lifaaqayada


**M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**

Tell: +252 6 1 2224441 / +252-616312787
E-mail. mojawa@online.no

Warqaddii guddoomiyaha Barlamaanka M. Sh. C. Jawaari, oo wasiirka Maaliyadda Cawil uu ku kor qoray go'aankiisa 13/4/13

Waxaa mudan in la xuso in guddoomiyaha barlamaanku uu ku amray isla warqaddiisa <u>in la soo dhameystiro shariciga dhismaha hey'adda.Waa hadda iyo barlamaan hortegid si loo sharciyeeyo hey'adda kuna noqoto hey'ad madax banaan oo mushaar iyo gunno xaq u leh.</u>

Dabadeed dokumentigii Hey'adda Admiraalka ayaa geeyey xafiiska R/Wasaaraha. Maalintaas R/Wasaarahu Dibadda ayuu ku maqnaa, waxaana xafiiska fadhiday MRW Xil Fowsiyo Xaaji Aadan Wasiirkii Arrimaha Dibadda ahaydna R/W ku-xigeen oo howsha xafiiska sii wada. Mrw Fowsiyo si wanaagsan ayey ii soo dhoweysay, markii aan u warramayna waxay fartay in la sii diyaariyo warqadda loo diraayo Barlamaanka, inta ay la shireyso wafdi u joogay. Hal saac ka dibna way saxiixday, fiiri warqadda hoose Admiraalka ayaa loo dhiibay warqadii si uu u geeyo G/Shacbiga.Runtii mahad iyo wanaag aan la soo koobi Karin ayey MRW Fowsiyo ka kasbatay Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed.



Jamhuuriyadda Soomaaliya
Xukuumadda Federaaliga ee Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال
الحكومة الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Government of the Somali Republic
*Office of the Prime Minister*

Ref: XRW/GB/00508/09/13

Taariikh: 09.09.2013

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka

Ujeeddo: <u>Ansixin Miisaaniyad Hay'adda Daraasaadka Badaha Soomaaliyeed</u>

Anagoo tixraacayna warqadda sumadeedu tahay **374/XG/11/13** taariikhdeeduna ahayd **21/maarso 2012**, kana soo baxday Xafiiska Guddoomiyaha Baarlamaanka ujeedadeeduna ahayd fasaxida Gunooyinka Shaqaalaha Hay'adda Daraasaadka Badaha Soomaaliyeed, ayaa Guddoomiyaha Baarlamaanka oo ay warqaddani sida tooska ah ugu socoto waxaa si xushmad leh looga codsanayaa in la hor geeyo Golaha Baarlamaanka Gunooyinka Shaqaalaha Hay'addaas si ay u ansixiyaans sida ku cad lifaaqa warqadda.

Sidaa darteed, waxaa la idinka rajaynayaa in aad u fududayn doontaan.

Waan ka qabtey
10/9/13

Wada Shaqayn Wacan.

Marwo Fowziya Yuusuf X. Aadan
Ku-simaha Ra'iisul Wasaaraha ahna Wasiirka Arrimaha Dibadda &
Iskaashiga Caalamiga

+252-61-6556732 +252699222813 E-mail: mabdulle@opm.gov.so Mogadishu, Somalia

Admiraalku wuxuu geeyey warqaddii G/Barlamaanka. Beryo yar ka dib, waxaa lagu soo daray Barnaamijka Barlamaanku ka doodayo, maalintaas shirka waxaa guddoominayey Gud ku xig 2aad Xildhibaan Mahad Cawad Cabdalla; durbadii Xildhibaan ayaa yiri: warqadda sooma saxiixin R/W Saacid ee dib ha loogu celiyo si uu u saxiixo waayo warqadda k/s ayaa saxiixday. Shir guddoonkina wuu aqbalay, nasiib darradeenna, sidaasna dib ayaa dokumentigii Hey'adda loogu celiyay xafiiska R/Wasaaraha. Arrintaan waxay nagu noqotay dhibaato cusub iyo dib u dhac hor leh.Waxaa weliba arrinta sii xumeeyey in warqaddii ay ka soo bixi kari weysay xafiiska R/Wasaaraha oo waxay tiillay muddo todobaadyo ah; ugu dambeyntii Admiraalku wuxuu qaabilay R/Wasaare Saacid oo markaas saxiixay warqaddii Barlamaanku sugaayey. fiiri sawirka warqadda R/Wasaaraha.

Dabadeed waxaa lagu daray ka doodidda Hey'adda qorshihii Barlamaanka, laakiin waxaa soo baxday mushkilo cusub oo sahal lagu mari waayey.

Waxaa soo baxday in Golaha hortiisa, haddii laga jeedinayo sharci qabyo qoraal ah in wasiir kaliya uu jeedin karo.Maxaa la sameeyaa waa in wasiir la soo helo, illeen wadda kale ma jirtee. Admiraalku wuu ka fikiray sidii loo heli lahaa wasiir u bandhigga Barlamaanka arrinta Hey'adda iyo sharcigeeda, ugu dambeyntii Admiraalku wuxuu u tegay wasiirkii Kheyraadka Md Cabdirisaaq Cumar Max'ed oo hadda ah (Dec 2015) wasiirka Amniga. Markii looga warramay wasiirka dhibaatada jirta, durbadii intii Admiraalku uu la joogay Cabdirisaaq wuxuu u qoray Barlamaanka warqadda *sawirkeedu* hoos ku yaal, asagoo ku yiri: aniga ayaa qof ahaan bandhigaya Hey'adda, warqadiina wuu u dhiibay Admiraalka. Runtii Admiraalka iyo shaqaalaha Hey'addu abaalkaas way u hayaan wasiir Cabdirisaaq.Waxaa la yiraahdaa: <u>dabeyshu waxay la timaadaa waxaan ka farxin doonleyda,</u> wasiir Cabdirisaaq safar ayuu dibadda u aaday.

Jamhuuriyadda Soomaaliya
Xukuumadda Federaaliga ee Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال
الحكومة الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

**Federal Government of the Somali Republic**
*Office of the Prime Minister*

---

Summad: XRW/GB/00.665.11.13 — 14/11/2013

Ku: Gudoomiyaha Golaha Shacabka =Muqdisho=

Og: Guddoomiyaha Hay'adda Daraasaadka Badaha Soomaaliyeed (HDBS) =Muqdisho=

UJEEDDO: SOO GUDBIN "XEER-NIDAAMIYAHA MAAMULKA HAY'ADDA DARAASAADKA BADAHA SOOMAALIYEED (HDBS)"

Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

| | |
|---|---|
| Markuu arkay | Qoddobada 97aad (1) iyo 99aad (A), (C) & (E) ee Dastuurka JFS. |
| Markuu arkay | Qoddobka 100aad (A) & (D) ee Dastuurka JFS |
| Markuu arkay | Go'aanka Golaha Wasiiradda summadiisu tahay SHGW.00.60.11.13 taariikhdiisuna tahay 14/11/2013 oo Goluhu ku ansaxiyey Xeer-nidaamiyaha Maamulka Hay'adda Daraasaadka Badaha Soomaaliyeed (HDBS). |

Isagoo tixgelinaya baahida loo qabo abuuritaanka Hay'adda Daraasaadka Badaha Soomaaliyeed (HDBS) oo kaalin mug leh kaga jirta horumarinta iyo kobcinta dhaqaalaha dalka.

Waxaan, Mudane Guddoomiye, halkan kuugu soo gudbinaynaa XEER-NIDAAMIYAHA MAAMULKA HAY'ADDA DARAASAADKA BADAHA SOOMAALIYEED (HDBS) si aad uga gudataan waajibkiina Dastuuriga ah (arag lifaaqa).

Waxaan rajeynaynaa in aad tixgelin doontaan meel-marsiinta ama ansixinta Xeer-nidaamiyaha (Hindise-Sharciyeedka) sare ku xusan.

Dr. Cabdi Faarax Shirdoon (Saacid)
Ra'iisul Wasaaraha
Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

---

+252-61-6556732 or +252-617001995 E-mail: pm@opm.gov.so Mogadishu, Somalia

Warqaddii R/W Saacid uu barlamaanka u diray si Hey'adda looga doodo.

1

*Wasaaradda Kheyraadka Dalka* *Sharciga Kalluumaysiga*

Dawlaadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Kheyraadka Dalka

**SUMMAD/WKHD/XW/342/2013** **Taariikhda: 14/11/2013**

**Ku: Raisul wasaaraha J.F.Soomaaliya** **=Muqdisho=**

**Ujeedo: Soo gudbin Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed, horayna u ansixiyeen Golahii wasiirada ee dowladdii ku meelgaarka 2012**

**Mudane Ra'iisul wasaare,**

Waxaa sharaf weyn ii ah in aan idiin soo gudbiyo Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed iyo sharcigii lagu aasaasayay laguna Mamulayo iyo in aan soo hordhigo golaha wasiirada ee xukuumadda federaalka Soomaaliya, si aay uga doodaan una ansixiyaan

**Wasiirka Khayraadka Dalka**

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: | Qod. 99aad Faqradihiisa A, B, C, E & F iyo Qod. 80aad Faqradiisa 1aad (A) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya oo Hindise-sharciyeedkani waafaqsan yahay. |
| Markuu arkay: | Qodobka 30 aad ee Dastuurka. |
| Markuu tixgeliyey: | Baahida loo qabo Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed oo kaalin mug leh ka qaadanaya kobcinta dhaqaalaha iyo shaqo-abuuridda dalka.<br>Miisaaniyada hay'adda way ku lifaaqantahay. Waxayna ku jirtaa miisaaniyadda 2014 |
| Wuxuu garwaaqsaday: | In uu curiyo sharciga Hay'adda lagu aasaasay isla markaana la horgeeyana Golaha Wasiirada. |

Wabilaahi towfiiq

**Mudane; Cabdirisaaq Cumar Maxamed**
**Wasiirka Kheyraadka Dalka**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE MINISTER
XWASIIRKA
MINISTRY OF NATIONAL RESOURCE
WASAARADDA KHEYRAADKA DALKA


Warqaddii wasiir Cabdirisaaq uu u qoray barlamaanka

Wasiir Cabdirisaaq dibadda ayuu safar u aaday, wuxuunna howshii Hey'adda ku dhaafay ku xig. Xildhibaan Saciido. Hase yeeshee wasiir ku xigkii way ku adkaatay inay ishortaagto Xildhibaanada; markaas ayuu Admiraalku ku yiri: Inoo gey Goddoomiyaha, markii aan u warrannay wuxuu ku yiri: Goddoomiye Jawaari gabadhii: Iska tag, Admiraaku asaga ayaa difaacanaaya Hey'addiisee; mahad ballaaran ayaa Admiraalku u jeediyey Guddoomiye Jawaari oo dhib jiray naga fududeeyey. Maalintii xigtay sida caadadu ay ahayd: Admiraalka ayaa Barlamaanku ka dhageystay arrinta Hey'adda waxa loo abuuray, ahmiyadda ay u leedahay dalka, ... wuxuu ku soo gunaanuday, sida caadadu tahay, in Barlamaanka laga codsado in la sharciyeeyo Hey'adda.



ADM. Faarax oo Barlamaanka ka hor jeediyey Ahmiyadda ay Dalka u leedahay
Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed.

Warbixintaan waxaa lagu magacaabaa aqrinta kowaad. Beryo yar ka dib waxaa timid aqrinta 2aad oo ah doodda Xildhibaanada, guud ahaan Barlamaanku wuu ogolaa Hey'adda, waxaana si gaar ah aan u xusi karaa Xildhibaanno ku dadaallay in laba gudbiyo (la aqbalo) isla maalintii 2aad (arrintaan oon caadi ahayn). Waxaan ka xusi karaa raggaas: Xil.Max'ed Max'ud Xeyd (Allaha u naxariistee) iyo Xildhibaan Xasan Abshir Faarax oo memberka kaga codsadeen Xildhibaanada in Hey'adda gacanta loo taago oo la ogolaado. Laakiin saddex Xildhibaan ayaa ka soo horjeesatay; waxayna kala ahaayeen Xildhibaan Cabdi Xaashi iyo Xildhibaan Max'ed Cabdi Yuusuf iyo Xildhibaan Cabdulaahi Jaamac; labada Xildhibaan ee hore: wuxuu Admiralku ku yiri: maxaad ku diidan tihiin Hey'adda in la sharciyeeyo: waxay yiraahdeen Faaraxow adiga waan ku naqaanaa oo waddani – nadiif ah ayaad tahay, laakiin rag waaweyn ayaa doonaya inay BADDA GADAAN, Hey'addunna ogaal la'aan ay ugu fududeyso. Waxaaan ku iri: BADDA cid kale oo dhiibi karta ma jirto ee adinku "Barlamaan ahaan ha dhiibina", dabadeed waxay ballan qaadeen inay ayidaayaan Hey'adda.Xil Cabdulaahi Jaamac waan la dooday laakiin wuxuu ku diidan yahay ma aanan fahmin.Calaa kuli xaal, sida caadadu ay ahayd, aqrinta 2aad ka dib waxaa lagu wareejiyey feylka Hey'adda guddiga kheyraadka ee Barlamaanka.Runtii guddigii si wanaagsan oo dhaqsi leh ayey u soo aqriyeen feylkii (Sharcigii Q.Qor), waxayna u soo gudbiyeen guddoonka Barlamaanka si loogu codeeyo 29/12/2013kii *fiiri sawirka warqadda* guddigu ay ku soo gudbiyeen.



Guddiga Beeraha,Horumarinta Reer
Miyiga, Xoolaha iyo Kheyraadka Badda.

جمهوريه الفدراليه الصوماليه
مجلس الشعب الصومالي
اللجنة البرلمانية لشؤن الزراعة والتنمية الريفية
والثروة الحيوانية والموارد البحرية

The Federal Republic of Somalia
House of the People
Committee of Agriculture, Rural Development, Animal Husbandry and Marine Resources.

Tr: 29/12/2013

Ku: **Guddoomiyahay Golaha Shacabka Soomaaliyeed** **=Muqdisho=**

OG: **Guddiga Joogtada ee Golaha Shacabka Soomaaliyeed.**

Ujeedo: **Soo Gudibin sharciga daraasadaha Baddaha Soomaaliya.**

Waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa sharciga daraasadda Baddaha, oo uu guddigu ka soo hawl galay. Markuu Guddigu ka shiray laba jeer, falanqeeyayna sharcigan, eegnayna siduu u qornaa.

Markaan fiirinay fikradaha xildhibaanadu ay ka dhiibteen.waxaan wax kabadal iyo ku daris yar ku sameynay sharicgan. Sidaa darteed Guddigu wuxuu isla gartay in loo gudbiyo Golaha shacabka is loogu codeeyo.

OK
HA LAGA QARTO

Waad Mahadsantihiin.

Guddoomiyaha Guddiga.

Siciid Maxamed Cali.

Said

JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
SOO GELID
NO: 699
TR: 29/12/13
SAXIIX:

29/12/13

Tel: +252615493803, +252699999217 E-mail: ...

Warqaddii guddiga kheyraadku ugu soo gudbiyeen hey'adda Gudoonka Barlamaanka

Waxaa la isku dayey in cod loo qaado maalmihii xigay; hase yeeshee buuq ku saabsanaa arrin kale ayaa ka dhacay fadhiga Barlamaanka, taasoo keentay in guddoomiyuhu Md Jawaari uu shirka deg deg u xiro, ayadoon cod la qaadin si buuqa loo joojiyo. Taasi waxay keentay dib u dhac socday ilaa Agoosto 2014kii.Markii la isyiraahdaba maanta ayaa gacanta loo taagayaa, arrin kale ayaa ka soo hoos baxda oo suurtagelin weysa codeynta, WAA ALLE AMARKIIS.

**MARXALADDII MADAXTOOYADA:**

Dhinac kale, waxaa soo baxay isbeddel, waayo Madaxwaynaha ayaa soo saaray Decreeto L. 29 ee 19/11/2013 oo si rasmi ah loogu magacaabey Admiraalka Guddoomiyaha **Haya'adda CilmiBaarista Badaha Soomaaliyeed.**

Decreetadan waxay la timid:

1. In Admiraalka laga dhigo Guddoomiyaha rasmiga ah ee Hey'aadda, hore KMG ayuu u ahaa.
2. In laga nasiyo Taliyanimadii C.badda ee X.D.S,  si uu ugu madax banaanaado howlaha Hey'adda
3. Xilka lagu saarey Guddoomiyaha decreetadan wuxuu ahaa sidaan:

Inuu dardargaliyo dhismaha Hey'adda, waxaana lagu sababeeyey magacaabidiisa: in khibrad aad u dheer uu u leeyahay arrimaha la xiriira badaha Soomaaliyeed iyo kuwa adduunka (Qod.1aad).*Eeg sawirka Decretada*.

Guddoomiyuhu wuxuu aad uga shuqlanaa la socodka Baarlamaanka iyo wixii la xiriira si loo ansixiyo Hey'adda, arrintaas oo iska jiitameysay nuskii hore ee sanadkii 2014ka. Dhinac kalena waxaa ka socdey, bacdamaa ay soo baxdey Decretadii magacaabida cusub in la raadiyo:-

1. Xafiisyo iyo Qalabeyntooda.
2. Kaadirkii Cilmibaarista.
3. Raadinta Miisaaniyadda Hey'adda.

Bishii luulyo ee 2014kii, Madaxtooyada ayaa kala soo wareegtay Baarlamaanka Dokumentigii Hey'adda si loo dedejiyo sharciyeynteeda.Waxaa arrintaas ka howlgalay la talayayaasha sharciga ee madaxweynaha asagoo culeys saaraayey lataliyayaasha si ay arrintaan u dadejiyaan.

Ugu dambeyntii waxaa ka soo baxay Madaxtooyada xeer Madaxweyne LR.44 ee dhismaha **Hey'adda CilmiBaarista Badaha Soomaaliyeed** 21/8/2014, sidaas ayeyna Hey'addii ku noqotay mid sharciyeysan.*Eag sawirka* xeerka mad/yada LR.44 ee21/8/2014.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
*Xafiiska Madaxweynaha*

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
*Office of the President*

---

**XEER MADAXWAYNAHA Lr. 29** **Taariikh 19/11/2013**
Magacaabid Guddoomiyaha Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed

**MADAXWAYNAHA JFS,**

**Markuu Arkay:** Qodobada 87,, Faqradda 1aad. Xuruufta 'a ', ' b ' iyo ' c ' Iyo faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad, Xuruufta ' b ' iyo ' c ' ee Dastuurka J.F.S

**Markuu Arkay:** Warqadda Wasiirka Gaashaandhigga Lr. WG/00701/13 ee 07/11/2013 Kuna saabsan soo jeedinta ah in la magacaabo Taliyaha Ciidanka Badda

**Markuu Arkay:** Sharciha Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 ee lagu dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Taliyaha Ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed Lr. N.T1/1-107/13 ee 06/11/2013.

**Markuu Arkay:** Inay muhiim tahay in la magacaabo Guddoomiyaha Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeda.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Xeerkaan loogu magacaabay S/Gaas Faarax Axmed Cumar inuu noqdo Guddoomiyaha Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed si uu door wayn uga qaato dardargelinta dhismaha Hay'adda, bacdamaa oo u leeyahay khibrad aad u dheer arrimaha la xiriira badaha Soomaaliyed iyo kuwa adduunkaba.

**Qodobla 2aad**

Waxaa Xeerkaan lagu baab'iyay sharci ama xeer kasta oo ka horimaanaayo.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkan dhaqangelayaa markii uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya uu saxiixo waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

**MUQDISHO 19/11/2013**

**Madaxwaynaha JFS**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

---

Somalia Presidency, Villa Somalia, Mogadishu, Tel: +2525-941000(Office), Fax: +2525-941001

Sawirka Decreeratada rasmi ahaan loogu magacaabay ADM. GAAS Faarax Axmed Cumar guddoomiyaha HCBS.

**XEER MADAXWEYNE LR. 44** TAARIIKH: 21/08/2014
DHISMAHA HEY'ADDA CILMI BAARISTA BADAHA SOOMAALIYEED

Madaxweynaha J.F.S.,

**Markuu Arkay**: Qodobka 87, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' iyo Faqeadda 2aad Dastuurka Federaalka KMG

**Markuu Arkay**: Xeer Madaxwayne Lr.29 ee soo baxay 19/11/2013 kuna saabsan magacaabista Guddoomiyaha Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed si uu dardar u geliyo Dhismaha Hay'addaan

**Markuu Arkay**: Go'aanka Golaha Wasiirada Lr. SHGW. 00.6O.11.14 ee la gaaray 14/11/2013 laguna ansaxiyay Xeernidaamiyaha Maamulka Hey'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed

**.Markuu tixgeliyay**: In ay jirto baahi loo qabo in kor loo qaado aqoonta cilmiyaysan ee Badaha Soomaaliyeed

**Markuu Ku qancay**: Soo jeedinta Golaha Wasiirada ee ku saabsan abuuridda Hey'addaas

**Waxa uu soo saaray Xeerkan:**

**Qodobka 1**.

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo Xeerkan, waxaa la dhisay Hey'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed.

**Qodobka 2**

Waxa ay Hey'addan u xilsaaran tahay in ay si cilmiyeysan u baarto arrimaha la xariira badaha Soomaaliyeed si loo helo talo ay Dowladdu ku gaarto go'aamada khuseeyo badaha iyada oo hawlgelinayso kana faa'iidaysanayso aqoonyahannada Soomaaliyeed iyo kuwo kaleba.

**Qodobka 3**

Hey'addaan waa hey'ad madaxbannaan oo leh shakhsiyad qaanuuni ah waxaana kormeer iyo toosin ku leh Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekadaha. Waxa ay Hey'addu awood u leedahay in ay qoroto shaqaale maamul iyo xirfadlayaal aqoon u leh cilmiga badaha oo joogto iyo waqti-dhiman ah iyada oo la waafijinaayo Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda Lr. 11 ee 05/12/2006

**Qodobka 4**

Waxa uu Xeerkan dhaqangelayaa marka uu Madaxwaynuhu saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliyeed.
MUQDOSHO 21/08/2014

**Madaxweynaha J.F.S**
**Mudane Xasan Sheikh Maxamuud**

**Hon. Yuusuf Macallin Amiin**
Wasiirka Dekadaha & Gaadiidka Badda



Decreetada L.44 ee Madaxweynahu ku sharciyeeyey HCBS

**Waajibaadka Hey'adda: Waxaa Hey'addu ay u xilsaaran tahay in ay si Cilmiyeysan u baarto arimaha la xiriira badaha Soomaaliyeed si loo helo talo ay Dowladdu ku gaarto go'aamada khuseeya Badaha iyada oo howlgelineysa kana faa'iideysanaysa aqoonyahanada Soomaaliyeed iyo kuwa kaleba** (Qod. 2aad ee Xeer L.44).

**NOOCA HEY'ADDA**:

HEY'ADDU WAA MID MADAX BANAAN OO LEH SHAKHSIYAD QAANUUNI AH, WAXAANA KORMEER IYO TOOSIN KU LEH WASIIRKA WASAARADDA GAADIIDKA BADDA IYO DEKEDAHA. WAXA AY HEY'ADDU AWOOD U LEEDAHAY IN AY QORATO SHAQAALE MAAMUL, XIRFADLAYAAL AQOON U LEH CILMIGA BADAHA OO JOOGTO IYO WAQTI DHIMAN AH IYADA OO LA WAAFAJINAYO SHARCIGA SHAQAALAHA RAYIDKA EE DOWLADDA L.11 EE 05/12/2006 (QOD 3AAD EE XEER L.44).

Haddaba sherciyeyntaan Hey'adda ka dib, waa in howshii si xog leh loo gudagalo, waxaana u horreeya in shaqalaha mushaar loo helo sanadkan inta ka dhiman, waayo miisaaniyadda 2014, Hey'addu way ku jirtay, laakiin sharciyeynta ayey helitaankeedu ku xirnaa.

Guddoomiyuhu waxuu u geeyey Wasiirka Maaliyada Md. Xuseen Cabdi Xalane Decreetadii sharciyeenta Hey'adda, waxuunna ka codsadey inuu inoo billaabo mushaarkii. Hase yeeshee meeshii laga filanaayey cir (roob), ceryaamo ayaa ka timid.Wasiir Xalane wuxuu yiri: Decreetadaan lacag laguma bixin karo.Waxaan ku iri: Talo keen? Wuxuu igu yiri: Hey'addaan Baarlamaanka ayey tiil, hadda madaxtooyo ayaad sharci ka wadaa. U tag Guddoomiyaha Baarlamaanka kana keen warqad caddeynaysa in Baarlamaanku ku wareejiyey Xukuumada feylka hey'adda. Waxay qasab igu noqotay inaan aado Guddoomiyaha Baarlamaanka oo waraaqadaas aan ka codsado inuu na siiyo, Decreetadiina waan tusay. Wuxuu igu yiri: Marka hore waa in Xukuumadu ay ii keento codsi la noqosho feylka Hey'addda. Howshu waxay ka bilaabaneysay in xukuumadu ka codsato Baarlamaanka inay dib ula noqoto feylka Hey'adda.Waxaase mushkilo noqotay Wasaaraddee la hoos keenayaa Hey'adda si wasiirkeedu u Qoro codsigaas asagoo sii marsiinaya xafiiska R/Wasaaraha. Waxaan u tegay Guddoomiyaha Barlamaanka, waxaanna ku iri: Md. Sidee arrintaan loo fududeyn karaa, wuxuu igu yiri: Wasiirkii aad rabtid (dooratid) ha ii soo qoro codsiga asagoo soo marsiinaya R/Wasaaraha, waxaan iri: waxaan dooranayaa Wasaaradda Badaha ku shaqa leh iyo Wasiirkeeda Md. Yuusuf Macallim Aamiin (Baadiyow), waxaanse warkii ku celiyey gudoomiyaha oon ku iri: Waxaan kaa codsanayaa, waayo waan dhibtoonnay, inaad ii yeeriso sida aad u rabtid in wasiirku uu kuugu soo qoro. Isagoo aad ugu mahadsan ayuu Guddomiye Jawaari ii yeeriyey warqaddii oo idil,

dabadeed waan soo qorey, waana u aqriyey si uu u ogolaado oo berri si fudud uu wax uga qabto. Ka dib waxaan u tegay Wasiir Baadiyow oon ku iri: Warqaddaan sidaan u qoran soo saar,

Waxaan ka keenay warqaddii Wasiirka Gaadiidka Badda & Dekedaha.*Eeg sawirkeeda*.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badda
Xafiiska Wasiirka

جمهورية ألصومال ألفيدرالية
وزارة الموانئ والنقل البحري
مكتب الوزير

SOMALI FEDERAL REPUBLIC
Ministry of Ports and Marine Transport
Office of the Minister

Ref: XW/WD&GB/001/138/2014 Date: 23/10/2014

**KU: Gudoomiyaha G/Shacabiga =Muqdisho=**
**Og. R/wasaaraha JFS =Muqdisho=**

**Ujeedo: Dib-Ula noqosho Hindise Sharciyeedka Hay'adda Daraasaadka Badda**

Texraaca warqadiina hore XRWKB/000I/82/10/2014, Kuna taariikheysneed 09/10/2014. Kuna saabsan in Xukuumadda go'aan ka soo gaarto hindisayaasha sharci golaha horyaallo ku waasoo uu kamid yahay hindise sharciyeedka ujeedadda ku qoran.

Mudane Gudoomiye waxaan kugu wargilinaynaa in xukuumaddu go'aamisay in hay'adda laga dhigo machadka,(Institute) Barashada & Daraasaadka Culuumta Badda oo leh Shakhsiyad Qaaniini.

Sidaa Darteed waxaan idiinka codsanaynaa in aad noo ogolaataan Hindise Sharciyeed kaasna Dib Ula noqono.

Mahdsanidiin

**Md. Yuusuf Macalin Aamiin**
**Wasiirka Wasaaradda Dekedaha iyo Gadiidka Badda**

Mobile: +252-61-8200012, +252-69-997666 E-mail: yusufmoallim@gmail.com

Warqaddii wasiir Baadiyow uu u qoray Goddoomiyaha Barlamaanka asagoo OG siiyey R/W

Dabadeed Guddoomiye Jawaari wuxuu qorey warqadda *sawirkeedu hoos* ku yaal uu ku caddeynaayo in loo ogoolaaday xukuumada in ay dib ula noqoto: feylka Hey'adda 26/10/2014



**Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya**
**Golaha Shacabka**
**Xafiiska Guddoomiyaha**

**جمهورية الصومال الفيدرالية**
**مجلس الشعب**
**مكتب الرئيس**

**Federal Republic of Somalia**
**House of the People**
**Office of the Speaker**

**Ref:**516 /5/5/9/14:الرقم

**Mogadishu,** 26th October, 2014 التاريخ

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.
Og: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
Muqdisho.
Og: Guddiga Beeraha ee Golaha Shacabka
L/H Golaha Shacabka
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/H Golaha Shacabka
Og: Xeer ilaaliyaha Guud
Muqdisho

Ujeeddo: Ogolaansho dib ula noqosho Hindise Sharci Hay'adda Daraasaadka Badda.

Tixraaca Warqadda XW/WD&GB/001/138/2014, kuna saabsan dib ula noqosho Hindise Sharciyeedka Hay'adda Daraasaadka Badda oo hadda Golaha horyaalo. Waxaan idinku wargelinayaa in Golaha codsigiina la noqoshada ku xusan warqadda halkaan ku lifaaqan uu ogolaaday Hindisaha kor ku xusan iyo soo jeedintiina ah in Hay'addaas aad ku bedashaan Machadka Barashada Daraasaadka Culuumta Badda.

Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka waxaa laga codsanayaa in sharcigaas dib u celinta u gudbiyo Xafiiska R/Wasaaraha kuna muujiyo shaxda Raad raaca Hindiseyaasha Sharci "Bill Tracking System".

Naga Guddooma Salaan Diiran iyo Qaddarin.

M.ne Muxammad Sh. Cusman "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

MJ/AM

**Tell:** +252 612224441/ +252 616312787
**E-mail.** speaker@parliament.gov.so **Website:** www.parliament.gov.so

Warqaddii uu ku ogolaaday guddoomiyaha barlamaanku in xukuumadu dib ula noqoto feylka hey'adda.

Admiraalku wuxuu u geeyey warqaddii Guddoomiyaha Barlamaanka Wasiirka Maaliyadda,

Laakiin weli Wasiir Xalane ma qanacsana oo wuxuu ku adkeystay in warqada bixinta mushaarka laga keeno R/Wasaaraha.WAXAA LA YIRI: MISKIIN LABO IYO TOBAN GARRUUN AYAA LOO HEYSTAA, HADDII KOW IYO TOBAN AY GEFTO, KAN LABO IYO TOBANAAD KII KU DHACA AYAA LA YIRAAHDAA.

Qasab ayey noqotey in la aado R/Wasaaraha. Md. Cabdiwali Sh.Axmad, asagoo ku mahadsan ayuu soo qorey warqadda *sawirkeedu hoos ku yaalo* hore arrinteedu u socotay.



**Jamhuuriyadda Soomaaliya**
**Xukuumadda Federaaliga ee Soomaaliya**
**Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha**

**جمهورية الصومال**
**الحكومة الفيدرالية**
**مكتب رئيس الوزراء**

**The Federal Government of the Somali Republic**
**Office of the Prime Minister**

**REF: SPM/00401/08/2014**

**Taariikh: 13/08/2014**

**Ku: Wasaaradda Maaliyadda**
**Og: Hay'adda Diraasaadka Badaha Soomaaliyeed**

**Ujeeddo: Bixin Mushaar**

Sida ku cad codsiga Hay'adda Diraasaadka Badaha Soomaaliyeed, kuna saabsan helid la'aan miisaaniyadii bilaha Abriil – Agoosto 2014 iyo Kharash howl maalmeedka (Petty Cash) bilihii Janaayo – Maarso 2014 (Arag Lifaaqa).

Haddaba, si ay howlaha Hay'addani ugu socdaan si hadsami leh, waxaa la farayaa Wasaaradda Maaliyadda in ay fasaxdo miisaaniyadda iyo kharashaadka Hay'adda bilaha sare ku xusan.

Shaqo Wacan,

**Md. Cabdiweli Sheekh Axmed**
**Ra'iisul Wasaaraha**
**Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

Warqaddii R/W Cabdiwali Sh. Axmed oo Hey'adda loogu ogolaaday in mushaar la siiyo.

Markii loo wada geeyey saddexdii Dokumenti oo ka soo baxday Saddexda mas'uul ee dalka u sarreysa, Wasiir Xalane wuxuu ogolaaday in shaqaalaha Hey'adda loo billaabo mushaarada ugu jirta miisaaniyadda 2014.

Mushaar helidii ka dib waxay noqotay mas'allada 1aad ee hey'addaan sidii lagu heli lahaa KADER cilmiyeed oo heysta ugu yaraan shahaado BA (BS), laakiin takhasusi ah, runtii hore xoogaa mushaar loo helay ayaa joogay oo ku shaqeeya guriga guddoomiyaha.

Waxaan aad u daneyneynay labada takhasus oo kala ah QAANUUNKA iyo Culuumta badda si howsha loogu billaabo.Waxay soo joogtaba waxaan maanta 2015 leenahay 24(afar iyo labaatan) Jaamici oo kala ah BA(BS)= 58%, MS(25%) PHD (iyo wixii u dhigma) 17% oo daboola ilaa 10(toban takhasus) oo badeed.